



# SCHOOL CHOICE *Xaflada*

*23ka Janaayo, 2018*

5-7 P.M.

## KU MILAN, LA MIDOW & LA KULAN ISKUULLADEENA

Xaflada Iskuullada Soonahaaga Ka Baxsan waxaa loo qabtaa waa fursada ugu fiican ee loogu booqan karo dhammaan iskuullada degmada hal galab iyo hal meel oo u wada dhaxaysa. Waalidiinta waxaa lagu boorinayaa inay ka soo qaybgalaan xafladan xog-waranka ah ee bilaashka ah, sidoo kalena madadaaladu ka buuxdo si ay aqoon fiican ugu yeeshaan iskuullada soonahooda ka baxsan ee sanad dugsiyeedka 2018-19. Ma jiro waqti kaga haboon sahaminta iskuulka ugu fiican ee ilmahaagu wax ka baran karo iyo waqti kaga fiican inaad oggaatid dhammaan waxyaabaha wanaagsan ee laga bixiyo Iskuullada Degmada.

**FAAHFAAHIN KALE WAC 615-259-4636 AMA  
BOOQO [WWW.MNPS.ORG/SCHOOLCHOICEFEST](http://WWW.MNPS.ORG/SCHOOLCHOICEFEST).**

*Keen goyska oo idil!*


*Waxyaabo madadaalo u leh gof walba!*



**GOOBTA: FAIRGROUNDS NASHVILLE**  
500 WEDGEWOOD AVENUE  
NASHVILLE, TN 37203



Iskuullada Dawladda Nashville (MNPS) ma sameeyaan takoor ku salaysan isir, diin, caqido, jinsi, aqoonsiga waxaa tahay lab iyo dhedig, lab iyo dhedig jinsigaad ka heshid, wadankaad u dhalatay, midab, da', ama naafo si laguugu oggolaado, si aad u gashid, ama u gudatid barnaamijyada, adeegyada, ama hawlaha ka socda. MNPS ma takooraan markay shaqaalaha qaadanaayan ama shaqaaluhu shaqadooda gudanayaan.





# Ilmahaaga u Raadi Iskuulka ku Haboon

## MAALMAHA MUDAN IN LA OGGAADO

### 10 JANAAYO, 2018

#### MAALINTA LA BILAABO QABASHADA ARJIYADA ISKUULLADA OPTIONAL-KA

- Arjiga waxaad ku buuxin kartaa online ama waxaad gacanta ku buuxin kartaa arjiga ardayda loo soo dhiibo.
- Codso ugu badnaan ilaa todobo iskuul.
- U kala saraysii iskuullada sida aad ahmiyada u kala siinaysid.
- Codso inta ka horeysa waqtiga kama danbaysta ah oo ah bartamaha Febaraayo-kuma xirna "sida loo soo kala horeeyo."

#### BOOQASHOYINKA ISKUULLADA BARTAMAHA JANAAYO

#### SOO BOOQO ISKUULLADA "MAALMAHA TALAADADA"

- Maalmaha Talaadada ee iskuullada la soo booqan karaa waa: 9, 16, 23 iyo 30ka Janaayo.
- Faahfaahin kale, booqo [www.mnps.org/visit](http://www.mnps.org/visit) ama la xiriir iskuulka.

### 23 JANAAYO, 2018

#### XAFLADA SCHOOL CHOICE

- La kulan shaqaalaha iskuullada ka socda.
- Aqoon u yeelo barnaamijyada iskuulku bixinayo.
- Is diiwaangeli si aad u soo booqatid iskuulka.

### 2 FEBARAAYO, 2018

#### WAQTIGA UGU DANBEEYA QABASHADA ARJIGA

- Si loogu daro bakhtiyaanasiibka, soo gudbi arjiga iskuullada soonahaaga ka baxsan inta ka horeysa waqtiga kama danbaysta ah.

### 23 FEBARAAYO, 2018

#### MAALINTA LAGU DHAWAAQO NATIIJADA

- Raadi iskuulka ilmahaaga aqbalay. Iskuullada hela codsiyo ka badan boosaska ka bannaan waxaa laga yabaa in leeyihiin liiska sugitaanka.
- Diiwaangeli ilmahaaga si aadan booskaaga u waayin.

## WAA MAXAY SCHOOL CHOICE?

*Go'aamada ugu muhiimsan ee waalidiintu gaadho waxaa ka mid ah iskuulka ay ilmahoodu u diraan inuu wax ka barto.*

Gudoonka Waxbarashada Degmada, waalidiinta wuxuu siiyaa fursad ay ubadkooda ugu diran iskuullada xaafadooda ku yaal ama iskuullada kale ee degmada dacadadeeda ku kala yaal. Waalidiinta raba inay doortaan iskuul ka baxsan xaafadooda, arjiyada iskuullada optional-ka waxaa la qaban doonaa 10ka Janaayo, 2018.

## WAA MAXAY AHMIYADA AY LEEDAHAY XAFLADA ISKUULLADA SOONAHA KA BAXSAN?

*Xafladu waa talaabada ugu horeysa ee waalidiintu ku oggaan karaan iskuullada soonahooda ka baxsan iyo meesha ay ka bilaabi karaan si ay ubadkooda ugu helaan iskuulka ku haboon.*

Waa marka keliya ee Iskuullada Degmada oo idil, iskuullada xaafada, iskuullada magnet iyo iskuullada kaleba hal meela ku kulmaan. Xafladu waa bilaash waxayna waalidiinta u sahashaa inay ka fiirsadaan iskuullada soonahooda ka baxsan ka hor intaysan go'aanka gaarin. Xaflada, waalidiintu waxay booqan karaan dhammaan iskuullada ay rabaan, waxay la kulmi karaan macallimiinta, waxayna wax ka weydiin karaan barnaamijka sidoo kale waxay samaysan karaan ballan si ay iskuullada u soo booqdaan.

## SIDA LOO CODSADO

*Arjiyada gacanta lagu buuxiyo iyo kuwa online-kaba waxaa la heli doonaa 10ka Janaayo, 2018.*

Waalidiintu waxay codsan karaan ilaa todoba iskuul, iyagoo u kala saraysiinaya sida ay u kala door bidayaan. Arjiyada soo gudbi inta ka horreysa waqtiga kama danbaysta ah oo ah 2da Febaraayo, 2018 si loogu daro bakhtiyaanasiibka.

Maalinta bakhtiyaanasiibka ardaydu waxay oggaan doonaan iskuulka aqbalay iyo iskuulka ku daray liiska sugitaanka.

